

## **Wax soo iibsashada dhijitaalka ah laga bilaabo 1da abriil**

Dhawaan waxaan u wareegi doonaa wax soo iibsashada dhijitaalka ah ee daryeelka iyo xannaanada. Tani waxay ka dhigan tahay qofka haysta tabarucaada wax soo iibsashada lagaa taageeri doono inaa alaabta uga dalbatid dhijitaal ahaan dukaamada bixiya adeega guryaha layskugu keeno.

### **Waxaa u baahan tahay inaa sidaan sameyso ka hor intaan la gaarin 1da abriil 2024**

Si aad u hesho taageero joogta ah ee wax iibsashada waxaad u baahantahay inaad iska diiwaangeliso akoonka isticmaalaha ama xubinnimada dukaanka aad rabtid inaa wax ka soo iibsatid. Wuxaadna ku sameyneysaa bogga shabakada dukaanka ama adoo boqda dukaanka. Inta badan waxaa u baahantahay inaa is cadeysid qofka aad tahay. Si aad akoon u sameysatid ama aad xubin uga noqotid waxaad u baahan tahay **akoonka emeylka** iyo **telefoonka gacanta**.

Wuxaad u baahan tahay inaa u diyaar garowdo in aad wax ku **bixisid** hab adiga amaan kuu ah. Habka lacag bixinta way kala duwan tahay waxayna ku xiran tahay dukaan aad wax ka iibsaneysid. Ma awoodid inaa lacag cadaan ah ku bixisid iibsiga dhijitaalka ah. Fuliyahaaga waa inuusan geli karin aqoonsigaaga elektarooniga ah (tusaale BankID). Haddii aadan maareyn karin nambarada sirta ah, waa inaad doorataa qaansheegadka ama aad wax ku bixisid kaarka dukaanka ama bangiga kaasoo ay ku jirto lacag xaddidan.

### **Sidan ayay u shaqeysaa wax soo iibsashada dhijitaalka**

- Fuliyahaaga wuxuu gurigaaga la imaanaa kombiyuutar ama tableet. Si wadajir ah ayaana u sameyneysaan wax iibsi iterinetka ah.
- Wuxaad arkeysaa inta dalabkaaga ku kacaayo intaadan dirin ka hor.
- Dukaanka gurigaaga ayuu kuugu keenaayaa alaabta. Adiga ayaa bixinaya kharashka ururinta iyo keenista
- Qofka aan awoodin inuu liiska qoro ama soo qaato alaabta waxaa loo oggolaanaayaa in taageero la siiyo.

## Doorashada dukaanka

Waxaad si xor ah u dooran kartaa dukaamada bixiya adeega wax iibsiga dhijitaalka ee guryaha layskugu keeno. Hadda waxaa bixiya adeega wax ku iibsiga dhijitaalka ee cuntada guriga laskugu keeno dukaamada Willys, Hemköp, ICA iyo Coop. Xitaa sharikadaha Foodora iyo Volt waxay ku siinaayaan adeega in guriga laguugu keeno alaaboo kala duwan. Way kala duwanaan kartaa inta dukaan ee xaafadaada ku taal oo ku siinaaya adeega in gurigaaga laguugu keeno. Haddii aadan adiga ogaan karin dukaamada aad dooran kartid, waxaa kaa caawinaayo adeeg bixiyahaaga.

Adiga ayaa dooranaaya in hal ama dukaamo badan wax laga soo iibinaayo kharashka ururinta iyo keenistaba adiga ayaa bixinaayo.

## **libka dhijitaalka wuxuu gacan ka geysanaayaa inaa si amaan ah wax u maareysid**

Marka wax soo iibsashada loo bedelo hab dhijitaal ah qofka haysta taageerada wax iibsasiga wuxuu helaayaa fursad uu saameyn ugu yeesho wax soo ibsashadiisa wuxuuna arkaayaa oo dooranayaa alaabta iyo qüimo dhimista. Waxaa kale oo ay gacan ka geysan doontaa in si amaan ah wax loo maareeyo sababtoo ah ma dhiibaayo qofka kaarka wax lagu iibsado ama lacag cadaan ah. Wax ku iibsashada dhijitaalka waxay khuseyn doontaa dhamaan noocyada badeecadaha, sida cuntada iyo baddecad maalmeedka alaabta farmashiyaha dharka iyo wixii la mid ah.

## **Baahida is bedeshay**

Haddii aadan u baahnayn taageerada wax iibsiga waxaad la socodsiineysaa adeeg bixiyahaaga, ama waxaad la xiriireysaa mas'uulkaaga caawinaad bixiyaha adigoo u maraaya dariiqa Xarunta adeega (servicecenter).

## **Macluumaad dheeri ah**

Waxaa wax badan oo ku saabsan horudhaca wax ku iibsashada dhijitaalka ka aqrisan kartaa [orebro.se/digitalainkop](http://orebro.se/digitalainkop). Haddii aad u baahan tahay talo, tilmaan ama taageero waxaad la xiriiri kartaa xarunta adeega degma Örebro (Servicecenter).

### **Faahfaahinta xiriirka xarunta adeega (servicecenter)**

Telefoon: 019-21 10 00

Xilliyada ay furantahay: Isniin–Jimce Saacada. 8-16.30

Cinwaanka booqashada: Näbbtorgsgatan 10

Xilliyada booqashada: Isniin–Jimce Saacada. 10-16

Emeylka: [servicecenter@orebro.se](mailto:servicecenter@orebro.se)